

LA JAANQAAD KOOXDAADA

Ku biirista waaxda gaadiidka ee magaalo, degmo, wakaalad qabiil, ama magaalo keliya ma bixiyaan mushaar wanaagsan, dheefo waaweyn, iyo jadwal caadi ah: ee dhisida saaxiibtinimada xiriir markaad u adeegayso bulshada deegaankaaga ayaa ah faa'iido kale! La shaqee xirfadlayaasha kale ee ay ka go'an tahay inay dadka si badqab leh oo degdeg ah ugu sameeyaan horumar, u bartaan oo u isticmaalaan farsamooyinkii ugu dambeeyay iyo teknoolajiyada si aad shaqada si sax ah u qabato.

Booqo **MNTransportationCareers.com** si aad u hesho xogo sida muuqaalo, shaqooyin lasoo dhejiyay, borofaylo, fursadaha tababarka, daraasado shaqo iyo xogo/ilo kale oo loogu talagalay si wax looga barto sida loo qaabeeyo xirfada dayactirka gaadiidka.

Diyaarso CDL kaaga? Dadka ka dalbanaaya hay'adaha deegaanka waa ay badan yihiin gaar ahaan dadka raba ama doonaaya inay helaan Shatiga Darawalnimada Ganacsiga.

KU XIRNOOW



Mareegta

mntransportationcareers.com



Iskaan ku samee si aad u hesho xog dheeraad ah




MINNESOTA LTAP
UNIVERSITY OF MINNESOTA

SHAQOYINKA GAADIIDKA DEEGAANKA EE MINNESOTA



Ee loogu talagalay dadka shaqo raadista ah (leh ama aan lahayn CDL)

Waxaan ka shaqeeyay waaxo shaqo oo kalduwan: taraafikada, wadooyinka, baakinada, waxbarashada injineernimada, badelida layrarka... Xog la xariirta xirfada, haddii aad joogteyso indho indheynta aadna awooda saarto waxyaabaha ku xiiso geliya, waxaa kuu furmaaya albaabo.”

Jacob Remmington, Shaqaale Dayactira Wadooyinka, City of Hopkins



“Gaar waxa aad hiigsaneyso.

La jaanqaad

kooxda dayactirka

Agaadiidkeena.”

DHEEFOOYIN WAAWAYN (SIDA DHIILITIRKA SHAQADA-NOLASHA)

Faa’idooyinka macquulka ah ee laga helo qaar badan oo kamid ah wakaaladaha deegaanka—daryeelka caafimaadka, qorshooyinka caymiska hawlgabka, fasaxa iyo waqtiyada mushaarka lagu helo, barnaamijyada badqabka iyo tababarka—waxay noqon karaan kuwo u qalma oo leh faa’idooyin dahabi ah waxayna meesha ka saari karaan mushaarka badan ee saacadiiba ee shirkadaha gaarka loo leeyahay qaarkood bixiyaan. Waxaad helaya waqti aad la qaadato saaxiibadaa iyo qoyskaaga si aad u wada sameysaan waxyaabo aad ku raaxaysataan waqtiga aad fasaxa tahay. Waxaad qorsheynaysaa mustaqbalkaaga adoo ku nool nolal buuxda sidoo kalena ka shaqeynaaya shaqada habboon maanta!



Dheefaha

Boosaska shaqooyinka shirkada dadwaynaha waxay bixiyaan dheefo badan oo qiimo leh—oo meesha ka saara farqiga mushaarka.



Jadwalada

Jadwalada shaqada waa kuwo si fiican loo qiyaasi karo oo caadi ah marka lala barbardhigo kuwa boosaska shaqooyinka shirkada gaarka loo leeyahay oo badan.



Dheelitirka Shaqada/ Nolasha

Shaqooyin badan oo ah kuwa gaadiidka waxay u baahan yihiin in muddo dheeraad ah laga sii shaqeeyo. Boosaska shaqooyinka wakaaladda deegaanka ah waxay u dhaw yihiin guriga waxayna u adeegaan bulshada.

U XIRFAD BARASHADA GUUSHAADA

Waa wax inta badan dhaca in dadku ay qabaan fikrado khaldan oo la xariira in boosaska dayactirka wadooyinka ay u baahan yihiin tababar ka badan inta ay dhab ahaantii u baahan yihiin. Boosaska badan oo kamid ah kuwa dayactirka gaadiidka ah, waxaad ku bilaabi kartaa shahaadada dugsiga sare ama tan GED. Marka aad koox gasho, tababarada takhasuska—sida qaabka loogu shaqeeyo qalabka qaab badqab leh—ayaa lagu bixiyaa shaqada. Shirkaduhu waxay badanaa taageeraan/ sameeyaan tababar dheeraad ah ama ruqsado ay bixiyaan (sida CDL) ayadoo loo maraayo tiro kasta oo barnaamij oo laga bixiyo guuda ahaan gobalka. Ka eeg tababarta bartaan [MNTransportationCareers.com](https://www.mntransportationcareers.com) si aad u ogaato xogaha sida shaqsi ah loo soo qaato iyo kuwa lagu helo onlaynka ee la heli karo si aad ugu horumariso aqoontaada, xirfadahaaga, iyo shaqadaada!

